# Warqadda Xaqiiqada

## DAAH-KA-QAADIDDA DAKHLIGA EE LOOGU-TALAGALAY TAAGEERADA ILMAHA

Labada waalidba waxaa waajib sharci ah ka saaran yahay taageerada caruurtooda furiinka iyo kala-guuridda kadib. Caruurta xaq sharci ah beey u leeyihiin taagaradaas.

Sida Hagayaasha Taageerada Ilmaha ee Federaalka *Federal Child Support Guidelines*[1] (Federal Guidelines) qabaan waalidiinta waxaa looga baahan yahay in aay bixiyaan xogta dakhliga oo buuxa ahna tii-ugu-dambeeysay si loo hubiyo cadad taageero oo cadaalad ah.

Warqaddan Xaqiiqada ah waxay bixineysaa war guud oo ku saabsan:

- **Cidda** u baahan in aay bixiso xog dakhli iyo **goorta** eey u baahan yihiin in aay bixiyaan;
- **Waa maxay** macluumaadka aay u baahan yihiin in aay bixiyaan; iyo
- **Maxaa** dhaca marka macluumaadka aan la bixin.

## Ciddee u baahan in aay bixiso xog dakhli iyo goorta eey u baahan yihiin in aay bixiyaan?

Waxaa jira waajibaadyo daah-ka-qaadidda dakhliga oo laba nooc ah: bilow iyo joogto (mid soconaya).

### *1. Waajibka daah-ka-qaadidda dakhliga ee bilowga ah*

Si loo go’aamiyo cadadka taageerada ilmaha ee bilowga ah, Hagayaasha Federaalka waxay u baahan yihiin in waalidiinta labadooda ama midkood uu bixiyo dakhligooda oo buuxa ee saddexdii sannad canshuureed ee ugu dambeysay.[2]

---

[1] Dhamaan gobolada iyo maamulada-gaarka ah waxay qaateen hagayaal taageero ilmo oo wax fara badan u eg Hagayaasha Federaalka (marka laga reebo Quebec halkaasoo aay qaateen wajahaad taageero ilmo oo ka duwan), laakiin waxaa dhici karta xoogaa kala duwanaan ah in aay jirto. Xogta ku saabsan hagayaashan waxaa laga heli karaa websiteyada http://www.justice.gc.ca/eng/fl-df/pt-tp/. Xaqiiqooyinka xaaladda qofka ayaa go’aamin doona hagayaasha khuseyn doona.

[2] Haddii Hagayaasha Federaalka aaysan khuseyn, wixii xog dheeraad ah fadlan soo xigo hagayaasha gobolada ama maamulada gaarka ah ee khuseeya soo sheegidda dakhliga la isaga baahan yahay. dheeraad ah.



Canada

**Labada waalidba** waxay u baahan yihiin in aay bixiyaan xogta dakhligooda haddii:

- aay jiraan heysasho ilmo oo qeybsan (split) ama wadaag ah (shared custody);
- aay jiraan kharashyo gaar ah aan caadi ahayn (special or extraordinaryexpenses);
- aay jiraan sheegasho dhibaato adag (claim of undue hardship);
- aay jiraan ilmo ah ama ka weyn da'da qaangaarka (age of majority) oo taageerada ilmaha loo xisaabayo si ka duwan haddii ilmaha uu ka hooseeyo da'da qaangaarka;
- waalidka bixinaya aay soo gasho wax ka badan $150,000 sannadkii;
- mid ka mid ah labada dhinac uu u ahaa sida-waalid-oo-kale (acting as a parent) ilmaha xaaskooda ama lamaanahooda (tusaale, waalid ilmo uu/aay dhalay/dhashay qofka aad is qabtaan).

Haddii mid ka mid ah xaaladahan aaysan khuseyn, waalidka bixin doona taageerada ilmaha oo kaliya ayaa looga baahan yahay in uu bixiyo xog(tiisa/teeda) dakhliga (tusaale, haddii mid ka mid ah waalidiinta uu keli u leeyahay heysashada ilmaha).

### *2. Waajibka sheegidda dakhliga ee soconaya ka dib amarka taageerada ilmaha ama marka heshiiska la gaaro*

Si loo hubiyo in caruurta aay helaan taageero cadaalad ah oo ku saleysan xog dakhli oo ah kii ugu dambeeyey, waxaa jira waajib saaran labada waalid oo ah in aay sii wadaan bixinta xogta dakhliga ah amarka taageerada ilmaha ama heshiiska la gaaro ka dib. Waajibkaan sharciga ah wuxuu ka imaanayaa sharciga, go'aanada maxkamadda, iyo/ama adeegyada maamulka (tusaale, adeega dib-u-xisaabidda[3]):

- **<u>Hagayaasha Federaalka:</u>** Hagayaasha Federaalka waxay leeyihiin haddii aay ka helaan codsi qoraal ah waalidka kale, waalidiinta aay tahay in aay bixiyaan xogtooda dakhliga si loo sugo taageero ilmo waa in aaysan bixin wax ka badan hal jeer sannadkii dakhligii ugu dambeeyey. Tan macnaheedu waa waalidka diraya codsiga xogta dakhligii ugu dambeeyey xaq buu u leeyahay xogtaas waalidka kalena waa in uu siiyaa.

- **<u>Isbedelka dakhliga:</u>** Maxkamadda Sare ee Kanada waxay tiri waalidiinta waa in aay bixiyaan taageero ilmo iyadoo lagu saleynayo dakhligoodii ugu dambeeyey ee waqtiga xaadirka ah.[4] Sidaas awgeed, waalidiinta waa in aay isla socodsiiyaan wixii dakhligooda iska bedela.

---

[3] Adeegyada dib-u-xisaabidda waa adeegyo goboleed ama maamulo-gaar ah oo bedeli kara taageerada ilmaha iyagoo ku saleynaya warkii ugu dambeeyey ee dakhliga. Liiska Adeegyada Cadaaladda Qoyska ee Dowladaha-ku-Saleysan (Inventory of Government-Based Family Justice Services) ee website-ka Wasaaradda Cadaaladda ayaa haya xog ah halka adeegyada dib-u-xisaabidda laga heli karo iyo cidda isticmaali karta adeegyadaas.

[4] *D.B.S.* v. *S.R.G.; L.J.W.* v. *T.A.R.; Henry* v. *Henry; Hiemstra* v. *Hiemstra, [2006] 2 S.C.R. 231, 2006 SCC 37.*

- **<u>Amar ama heshiis:</u>** Amar taageero ilmo ama heshiis ayaa keeni kara in looga baahdo waalid in uu siiyo xog dakhli waalidka kale waqti cayiman ama xaalado cayiman.

- **<u>Adeeg dib-u-xisaabid:</u>** Waalidiinta sidoo kale waxaa dhici karta in looga baahdo in aay bixiyaan dakhligooda haddii taageerada ilmahooda ama heshiiska lagu diiwaan-geliyo "adeeg dib-u-xisaabid".

## Xog dakhli noocee ah ayeey waalidiinta u baahan yihiin in aay bixiyaan?

Xog dakhli oo buuxa ahna tii ugu dambeysay **waa in** la bixiyaa waana in aay ku jiraan:

- Canshuur celin dakhli ee mid walba oo ka mid saddexdii sanno ee ugu dambeysay, iyo
- Foomamka ogeysiisyada qiimeynta iyo dib-u-qiimeynta ee ka yimi Wakaaladda Dakhliga Kanada (Canada Revenue Agency) ee mid walba oo ka mid ah saddexdii sannad canshuureed ee ugu dambeeyey.

Waxaa **dhici-karta** in waalid looga baahdo in uu la wadaago xog dakhli kale, sida:

- Ooraahda ama warqadda mushaarka ee ugu dambeysay , ama warqad ka timid meesha shaqada oo sheegeysa mushaarkooda ama lacagta la siiyo;
- Ooraahda lacagta soo gasha (financial statement) haddii waalidka uu iskiis-u-shaqeysto ama uu xukumo shirkad;
- Xog ku saabsan dakhliguu ka helay ceymiska shaqada, ceymiska shaqaalaha, lacagta la siiyo curyaamiinta, ama kaalmada bulsho ama dadweyne.

## Ka waran haddii waalidka uusan bixin xogta?

Sharci ahaan, waalidiinta waa in aay bixiyaan xogtoodii dakhli ee ugu dambeysay oo buuxda marka looga baahdo. Haddii waalidka uusan ixtiraamin waajibkaas, maxkamadda waxay kartaa, tusaale ahaan:

- in aay amarto in la bixiyo dakhliga (amar daah-ka-qaadid ah);
- in aay ka soo qaado waalidka dakhligiisa cadad go'an taageerada ilmaha darteed oo aay amar ku bixiso iyadoo ku saleyneyso dakhligaas (dakhli la qoondeeyey)
- in aay amarto waalidka in uu bixiyo taageerada ilmaha ee lagu lahaa ilaa waqtigii dakhliga isbedelay (amar dib-ka-soo-bilaabid ah);
- in looga baahdo in uu bixiyo kharashka sharciga ee ku baxay waalidka kale;
- in aay ku hesho waalidka ixtiraam-darro maxkamadeed, taasoo keeni karta ganaaxyo iyo/ama xabsi.

| |
|---|
| Hagayaasha Taageerada Ilmaha ee Federaalka ah: Daabacaad talaabo-talaabo ah oo ku yaala bogagga Sharciga Qoyska ee website-ka Wasaaradda Cadaaladda Kanada http://www.justice.gc.ca/eng/rp-pr/fl-lf/child-enfant/guide/index.html ayaa bixiya xog dheeraad ah oo ku saabsan arrimaha taageerada qoyska. |

***Ma ogeyd in Wasaaradda Cadaaladda Kanada aay leedahay xog faa'iido leh oo lacag la'aan ah oo ku saabsan furiinka iyo kala-noolaashaha oo loogu talagalay dadka waaweyn iyo caruurta? Ka ogoow wax dheeraad ah fiidyowgan gaaban, ama booqo website-keena:***

***Canada.ca/family-law***

**Afeef:** Kani maaha qoraal sharci ah ama kuma siinayo talo sharci ah. Sharciga qoyska maadaama uu dhib-badnaan karo, caadi ahaan waxaa ugu fiican shaqsiyaadka in aay talo ku saabsan xaaladdooda ka helaan qareen sharciga qoyska yaqaan. Qareenadan ayaa ah kuwa ugu wanaagsan ee bixin kara talo sharci oo ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadyada. Xiriirada sharciga ee gobolada iyo maamulada-gaarka ah badankood waxay bixiyaan Adeegyo U-gudbin Qareen (Lawyer Referral Services). Qareenada qaarkood ayeey dhici kartaa talada bilowga ah in aay lacag la'aan ama qiimo yar ku bixiyaan, ama shaqsiyaadka waxay go'aansan karaan in aay la tashadaan qareen marar yar si uu uga caawiyo qeybo gaar ah ee xaaladdooda gaarka ah.